Isbedelka Dhanka Daryeelka Caafimaadka ee Quseya Qaxootiga iyo Soo Galootiga/Muhaajirrinta

Laga bilaabo bisha Janaayo 2014, Isbedelka federaaliga ah ee dhanka caafimaadka waxa uu caawiyey qaxooti iyo muhaajiriin badan oo ku nool gobolka Maine, si ay helaan daryeel caafimaad. Waxyaabaha laga caawin karo waxaa ka mid ah qarashka dhaqtarka iyo daawooyinka.

Suuqa cusub ee lagu kala iibsado caymiska caafimaadka wuxuu si sharci ahaana ah u suurta gelinayaa qaxootiga iyo soo galootiga caymis caafimaad oo ka bixiya kharashka caafimaadka.

Marka aad buuxiso codsiga caymiska khaaska ah waxaad ogaan doontaa oo laguu sheegayaa haddii aad xaq u leedahay kaarcaafimaad. Kaarka caafimaadka ee loo yaqaano **MaineCare** waxaa loogu talo galay inuu caawiyo dadka dakhligoodu yar yahay.

Haddii aadan xaq u lahayn kaar caafimaad (**MaineCare)** waxaad iibsan kartaa caymis caafimaad oo khaas ah.

Ku jawaab HAA labada su'aal oo soo socota, waxaa laga yaabaa inaad xaq u yeelato kaar caafimaad (MaineCare)

1. Ma heli karaa kaarka caafimaadka (MaineCare) marka la fiiriyo duruuftayda dhaqaale?

Iyada oo la fiirinayo dakhligaaga, waxaa laga yaabaa inaad hesho kaarka caafimaadka (MaineCare) haddii aad tahay(1) caruur (ka yartahay 21); (2) Uur aad leedahay; (3) waalid; (4) qaangaar cuuryaan ah; amaba (6) waayeel 65 jir ama ka weyn.

2. Ma heli karaa kaarka caafimaadka (MaineCare) marka la fiiriyo xaaladayda sharciga socdaalka?

Waxaa laga yaabaa inaad hesho kaarka caafimaadka haddii aad ka mid tahay kuwa hoos ku qoran:

- Ka yar tahay 21 aadna ku joogto sharci wadanka;
- Uur leedahay sharcina ku degan tahay wadanka;
- Qaxooti aad tahay;
- Heshay magan galyo (haddii codsigaaga aanan wali go'aan laga gaarin da'daaduna ka wayn tahay 21, uurna aadan lahayn xaq uma lihid kaarka caafimaadka); **AMA**
- Aad leedahay sharci deganaasho (with a green card) ugu yaraan 5 sano.

Kaarka caafimaadka degdega ah: Haddii aad ku jawaabtay HAA su'aasha **#1 balse Maya tan #2**, waxaad heli kartaa kaarka caafimaadka degdeg ah. Kaarkaasi waxa uu daboolayaa qarashka caafimaadka degdeg ah oo ka liya.

Barnaamijyada Kaarka Caafimaadka: Haddii aad sharci ku joogto wadanka kana weyn tahay 65 sano aadna joogtay wadanka in ka badan 5 sano waxaad heli kartaa kaarka caafimaadka ee loo yaqaano **Medicare**. Codsiga caymiska lagu gato ayaad ka ogaan kartaa haddii aad xaq u leedahay kaarka caafimaadka (medicare)

Haddii aad si sharci ah ku joogto wadanka oo aadan heli karin kaarka medicare-ka loo yaqaano waxaad iinsan kartaa ceymis caafimaad khaas ah. Waxaa laga yaabaa inaad xaq u yeelato in lagaa caawiyo gadashada caymiska caafimaadka khaaska ah.

Soo galootiga soo socda ayaa ku joogawadanka si sharci ah "Lawfully Present" waxayna heli karaan in laga caawiyo iibsashada caymiska caafimaadka ee khaaska ah:

Qaxooti	Is dhiibay
Muhaajir deganaasho leh (green card)	Go'aan ka sugaya codsiga is dhiibida (with work authorization)
Muhaajir laga aqbalay wadanka	Soo galooti denbi weyn galay
Haddii aad tahay Cuban amaba Haitian Entrants	Shaqaale heesa fiisaha H-2A and H-2B visas
Dhib kala kulmaya caruur ama xaas	Sharci ku meel gaar ah leh (TPS)
Soo galootiga arrimaha sharcigooda dib loo dhigay	Kuwa kale oo ku jooga wadanka sharci

Goorma ayaad gadan kartaa caymiska caafimaadka ee suuqa lagu iibsado? Waxaad isqori kartaa waqtiga ay qorista furan tahay sanad kasta.Haddii xaaladda noloshaada isbesdesho amaba aad tahay ruux gobolka Maine dhawaan u soo guuray, waxaad isqori kartaacaymis caafimaad ee suuqa marka aad doonto.

Dhaqaale ahaan ma la awoodi karaa in la iibsado caymiska caafimaadka ee suuqa ?

Haddii dhaqaalaha ku soo gala uu yaryahay aadna iibsan Karin Maine Care-ka waxaad suurta gal ah inaad hesho canshuur dhaaf , iyo inaad caawin ka hesho dowladda federaalka si aad isaga bixiso caymiska caafimaadka ee sanadka 2015.

Dhaqaalaha ku soo gala in uu la egyaha: Haddii ay ku soo gasho wax ka yar 4 jeer heerka faqriga (400% heerka faqrinimada dowladda federaalka) Markaas waxaad heli kartaa in lagaa caawiyo qorshaha caymiska caafimaadka (Eeg waxa ku soo gala = Intee in la eg ayaad kaalmo heli kartaa).

Haddii waxa ku soo gala ay (2.5% ka hooseyso heerka faqiirnimada dowladda federaalka xaddidday (250% heerka faqriga dowladda federaalka).Waxaa lagaa caawini karaa kharashka aad jeebka ka bixineysid,marka aad daawa iibsaneysid. (fiiri waxa ku soo gala iyo inta aad kaalmo u baahan tahay u dhiganta waxa ku soo gala.

Sidee aan ku ogaan karaa caymiska caafimaadka ee ii qalma?

Waxaad buuxin kartaa codisga caymiska caafimaad, adiga oo isticmaalaayo taleefoonka, amaba tag oo soo ogow inaad xaq u leedahay kaarka caafimaadka (MaineCare) iyo haddii lagaa caawin karo gadashada caymis caafimaad oo macquul ah. **Si aad in badan u ogaato soo booqo www.healthcare.gov amaba wac suuqa qaran ee iibsashada caymisk caafimaadka teleefoonkiisa oo ah: 1-800-318-2596**

Ma ku qasban ahay inaan iibsado caymis caafimaad?

Laga bilaabo bisha Janaayo ee sanadka 2014 waxaad heli kartaa kaar caafimaad haddii aad wadanka si sharci ku joogto. Haddii uu dakhligaagu aad u yar yahay oo aan lagaaga bahneyn inaad canshuur xarayso, amaba caymis caafimaad uu ku kalifi karo 8% oo ka mid ah dakhligaaga, uma baahnid inaad caymis caafimaad iibsato. Haddiise lagaa rabo inaad caymismiibsato (marka la fiiriyo dakhligaaga) oo aad iibsan waydo caymis caafimaad waa lagu ganaaxi doonaa marka aad xareynayso canshuurta.

Ka waran haddii aanan u qalmin Kaarka Caafimaadka (MaineCare), aanan awoodin inaan iibsado caymis caafimaad?

CarePartners ayaa dadka ka caawiya qarashka dhaqtarka iyo waxii la xariira ee meelaha qaar. Wac nambarkan si aad u ogaato **(Call 1-877-626-1684)**

MedAccess waxay dadka ka ccwisaa qarashka daawada. Wac nambarkan si aad u ogaato **(Call 1-877-275-1787)**

Hospital Free Care (Daryeelka lacag la'aanta ee uu isbitaalku bixiyo) Ma ahan kaar caafimaad, balse waxa uu kaa taageeri karaa qarashka qaarkiis haddii uu dakhligaagu yar yahay.

Si aad Kaarka caafimaadka ee aad heli karto wac taleefoonkan: 1-800-965-7476